

**Minnesota Storytime
Reading Guide**


Cinwaanka: *The Lion's Share / Qayb Libaax*

Qoraaga: Said Salah Ahmed

Farshaxanka: Kelly Dupre

**Daabacaadda iy
Taariikhda Xaqa
Daabacaadda:** Minnesota Humanities Commission, 2007

Xiriirka Minnesota: Qorayaal ree Minnesota ah, daabace reer Minnesota ah



Hordhac:

Buugan waa sheeko xariiro Soomaaliyeed oo dib loo soo tebinayo. Libaax iyo xayawaan kale waxay isku raaceen sidii ay neef geel ah usoo ugaarsan lahaayeen dabadeedna ay u qeybsan lahaayeen. Sheekadan waa mid ka mid ah afar sheeko xariirooyin Soomaaliyeed oo labo luqadood ku qoran, sawiranna, uuna daabacay Barnaamijka Buugaagta ku Qoran Laba Luqadood ee Hay'adda Minnesota Humanities Center. Hadii aad doonaysid akhbaar dheeraad ah, booqo websaydka: www.minnesotahumanities.org.

Da'da loogu talagalay: 4-6, 7-10

**Habka loo akhriyayo
sheekada:**

- Khariidada tus carruurta si'ay u tilmaamaan meesha ay Soomaaliya ku taal.
- Sheekada oo dhan hal luqad ku akhri si fahmideedu u sahlanaado.
- Hadii qofka akhriyaya uusan ku hadlin labo luqadood, isticmaal cajaladda "CD" ay ku duuban yihiin sheekada oo labada luqadoodba ah ee ay soo saartay Hay'adda Minnesota Humanities Commission.

**Su'aalaha inta aadan
akhrin:**

- Sheekadi waa sheeko laga yaqaan dalka Soomaaliya ee ku yaal qaaradda Afrika. Waa maxay xayawaanada laga helo Soomaaliya? Sawir xayawaan kasta sida uu sheekada ugu jiro.
- Xayawaankee ah boqorka kaynta? Erayadee u isticmaali lahayd inaad xayawaankaa sharaxaad ka bixisid?
- Soomaaliya, libaaxyada, xayawaanada kale iyo dadkuba way cunaan geela. Hadii aad haysan lahayd saxan weyn oo hilib ah, side dadka kale ula qeybsan lahayd? Ma adaa wada cuni lahaa? Ma kala bar baa u kala qeybin lahayd? Qofba mar miyuu goosan lahaa cantuugo? Taas ma cadaalad baa?

**Waxaad sheekada ku
bilowdaa:**

Sheekadi waxay ku saabsan tahay koox habar-dugaag ah oo isku soo raacay sidii ay neef geel ah soo ugaarsan lahaayeen dabadeedna ay u qeybsan lahaayeen. Bal aan aragno sidii ay u qeybsan lahaayeen hilibka...

**Su'aalaha marka
sheekada la akhriyo:**

- Sidee u sharxi lahayd sheekada?

- Waligaa ma maqashay oraahda “Qeyb Libaax”? Sidee loo isticmaalaa?
- Sidee u bedeli lahayd dhamaadka sheekada?

WAXYAABO KALE OO SHEEKADA LA XIRIIRA

- Farshaxanka:**
- Samee maasgaro “mask” libaax (isticmaal saxamada waraaqaha ah, waraaqo, iyo koollo). Carruurta u daa sidii ay u sawiri lahaayeen sawirada libaaxa.
- Dhaqanka:**
- Wax ka baro dhaqanka Soomaaliya adoo galaya websaydka: <http://www.cal.org/co/somali/index.html>
- Jilidda:**
- Carruurta ha u labistaan qaabka sheekada, hana jilaan hana sameeyaan boombaleyaal, si ay carruurta sheekada u jilaan ayagoo boombalayaasha iisticmaalaya, ama sheekooyin cusub ay u sameeyaan.
- Luqadda:**
- Carruurta hasoo ururiyaan oraahda “qeyb libaax” ayagoo ka raadinaya buugaagta kale isticmaalaya oraahdan. (Fasalka hala qeybsadaan buugaagta iyo joornaalada kale ee isticmaalaaya oraahdan). Fasalku ha falanqeeyo in erayga “qeyb libaax” si fiican ama si xun loo isticmaalo.
 - Sheekada barbardhig sheekooyinka kale ee ku jira buugga sheekooyinka ee “Aesop” eek u jira websaydka: <http://www.aesopables.com/cgi/aesop1.cgi?sel&TheLionsShare>
- Xisaabta:**
- Carruurta sheekada ha u sheegaan ardayda fasalka ama qeyb ka mid ah ardayda. Koox kasta sii sawir pizza si ay u qeyb sadaan. Ha u qeybsadaan si jajab ah (1/2, 1/4, 1/8, 1/16). Ha ka wada hadlaan qofka qaadanaya qeybta ugu weyn.
- Sayniska:**
- Si aad akhbaar dheeraad ah uga hesho Afrika, booqo websaydka: http://www.nationalgeographic.com/kids/creature_feature/0109/lions.html dabadeedna riix sawirka libaaxa.
 - Si aad u heshid waxyaabo kale oo aad sameyn kartid, fiiri websaydka: www.minnesotahumanities.org
- Qoraalka:**
- Sheekada dib o u qor adoo ka eegaya sida libaaxu u arko.
- Waxyaabo kale:**
- Si aad u heshid waxyaabo kale oo aad sameyn kartid, fiiri websaydka: www.minnesotahumanities.org
 - Si aad u heshid fikrado kale oo ah aad isticmaali lahayd sheeko xariirooyinka, fiiri websaydka: http://edsitement.neh.gov/view_lesson_plan.asp?id=240
- Talooyin la siinayo kuwa barta af-Ingiriiska:**
- Carruurta sheekada oo kooban ha ka sheekeeyaan. Ku qor qormooyin gaagaaban waraaqo si ay ardaydu ugu isticmaalaan inay sheekada ku soo celiyaan.
 - Ka codso in ardayda ama waalidka Soomaalida ah ay ka qeyb qaataan sheekada.
- Buugaag la xiriirta sheekada:**
- ***Dhegdheer*** waxaa qoray Marian A. Hassan, sawirada waxaa u sameeyey Betsy Bowen (Minnesota Humanities Commission, 2007)
 - ***Eating Fractions*** waxaa qoray Bruce McMillan (Scholastic, 1991)
 - ***Honey..Honey..Lion!*** waxaa qoray Jan Brett (Penguin, 2005)
 - ***The Lion and the Mouse*** waxaa qoray Bernadette Watts (North-South, 2000)
 - ***Lions (Our Wild World)*** waxaa qoray Cherie Winner, sawirada waxaa u sameeyey John F. McGee (Northword Press, 2001)

